IIB MA GALO

# FAAFIN RASMI AH

الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Sannadka 16aad Muqdisho, 18ka Nof. 1988 L. 1 R 11

جريدة شهرية FAAFIN BIL SOO BAXA

Laanta Faafinta Rasmiga ee Madaxtooyada J. D. Soomaaliya

QIIMUHU: waa 5 shilin lambar walba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibaddeedana waa Shs. 300. Rukunka 1 aweydiisto wuxuu ka bilaabmaa 1 Jannaayo. Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

## K O O B N I I N

### QAYBTA KOWAAD

### SHARCI

### QAYBTA LABAAD

### X E E R

XEER WASAARADDA ARR. GUDAHA L. 24 ee 29 Sebt. 1988, Aqoonsi Urur Samafal Bog; 791

XEER WASAARADDA ARR. GUDAHA L. 25 ee 13 Juun. 1988, Aqoonsi Urur Samafal. » 805

### QAYBTA SADDEXAAD

### TALOOYIN ISGAARSIIN OGE. IYO WIXII LA MID AH.

MAXKAMADDA GOB, BANAADIR, 5.10.88. Lumid J/War. L. 0012300 ku qoran Xabiiba » 806

Wakaaladda Madbacadda Qarankà

MAXKAMADDA G. BANAADIR 5.10.88, Lumid Buug Kayd L. 3036 ku qoran Dhuubo Cabdi Maxamed L. 489 » 807

MAXKAMADDA G. BANAADIR 15.10.88 Lumid Buug Kayd L. 18881 ku qoran Maxamed Cali Maxamed L. 490 » 808

MAXKAMADDA G. BANAADIR 26.10.88 Lumid 2 Jeeg War. L. 714831-0674074 ku qoran C/qaadir Axmed Cali L. 491 » 809

MAXKAMADDA G. BANAADIR 29.10.88 Lumid Jeeg War. L. 0333428 ku qoran Ismaaciil Xaaji Abuukar L. 492 » 810

MAXKAMADDA G. BANAADIR 1.11.88 Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Cali Maxamed Guure L. 493 » 811

MAXKAMADDA G. BANAADIR 1.11.88 Lumid Buug Kayd L. 2.958 ku qoran Maxamed Cali Geele L. 494 » 812

MAXKAMADDA G. BANAADIR 1.11.88 Lumid Jeeg War. L. 1221257 ku qoran Cabdi Xasan Cosoble L. 495 » 813

MAXKAMADDA G. BANAADIR 27.10.88 Lumid 4 Jeeg War. ku qoran Ismaaciil Axmed Maxamed L. 496 » 814

MAXKAMADDA G. SH/HOOSE 5.11.88, Lumid Buug Kayd L. 7016 ku qoran Yuusuf Axmed Xasan Cilmi L. 497 » 815

MAXKAMADDA G. BANAADIR 8.11.88 Lumid 22 Jeeg War. ku qoran Cali Maxamed Guure L. 498 » 816

MAXKAMADDA G. BAY 31.8.88 Lumid Buug Kayd L. 4747 ku qoran Muxubo Xuseen Macalin Maxamed L. 499 » 817

MAXKAMADDA G. BANAADIR 10.11.88 Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Saxardiid Raage Kheyre L. 500 » 818

MAXKAMADDA G. BANAADIR 9.11.88 Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Cabdirisaaq Maxamed Ciise L. 501 » 819

MAXKAMADDA G. BANAADIR 10.11.88 Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Maxamed Salaad Xasan L. 502 » 820

MAXKAMADDA G. BAY 10.10.88 Lumid Jeeg War. L. 1262580 ku qoran Shira Khaliif Baalle L. 503 » 821

MAXKAMADDA G. BANAADIR 9.11.88 Lumid Jeeg War. L. 0222663 ku qoran Xuseen Xasan Hiraabe L. 504 » 822

MAXKAMADDA G. BANAADIR 28.9.88 Lumid 5 Jeeg War. ku qoran Aamina Maxamed Xasan L. 505 » 823

XEER WASAARADDA ARR. GUDAHA L. 24 29.9.88, Aqoon si Ururka Samafalka Land And Human Resources Dev elopnent (DDDHIS) DELDHIS.

ISAGOO ARKAY: Dastuurka J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Sharciga Lr. 30 ee 30.7.84 ee lagu dhisay Wasaaradda Arrimaha Gudaha.

ISAGOO ARKAY: Qodobka 54/2 ee Xeerka Madaniga Soom aaliyeed Lr. 37 ee 2.6.2975.

ISAGOO ARKAY: Xeerka lagu dhisay Ururka Samafalka ah.

ISAGOO TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay abuuris Ururo la nooc ah.

WUXUU GUDOONSHAY:

Qodobka 1aad

Waxaa si rasmi ah loo aqoonsaday Ururka Samafalka (Lana an Human Resources Deuolopment) oo urur samafal ah, ujeeddadiisuna tahay horumarinta mashaariicda la xidh iidha daryeelka nolosha miyiga iyo Bandarka intaba. Sida Biyaha, Beeraha, Xoolaha, Waxbarashada iyo Caafimaadka Miyi iyo magaalaba.

Qodobka 2aad

Ururka wuxuu saldhiggiisu noqonayaa Muqdisho, wuxuu na laamo ku yeelanayaa Gobollada iyo Degmooyinka Dalka iyo Dibadiisaba.

Qodobka 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Wasiirka Arrimaha Gudaha, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 29.9.1988.

WASIIRKA ARRIMAHA GUDAHA

Dr. Maxamed Cabdulle Bacadle

UJ: CODSI AQOONSI HAYAD SAMAFAL AH KUNA MAGAC DHEER (DDDHIS DALDADDHIS).

Waxaa halkaan ku lifaqaya dastuurka hayad samafal, aniga oo ah gudomiyaha Amran, isla markaasna codsanaya

In Wasaaraddu aqoonsato, una fidiso tageero lagu hirgeliyo hayadaas.

Asasaha qura ee fekerey hayadan waa ninka saxiixay Warqadan.

GUDOMIYAHA HAYADDA D.D.DHIS.

Dr. C/man Sh. Xasan.
P.O.Box 1625 Tel. 22.868

Muqdisho, 20.7.1988.

BISMILLAAHI RAXMAANI RAXIIM

SHARCIGA HAY,ADDA

I. MAGACA

Hay'adda magaceeda waxa la yiraahdaa Dal Daddhis, Waxaana loo aqoon sanayaa Dal Daddhis.

II. TARJU MAD/MICNAYN.

1 Dal Daddhis Xarafkaan, markii Af-Soomaaliga loo eego, Dastuurkaan dhexdiisa micnaha uu ku leeyahay waxa weeye: Land & human Resources Development (LHRD).

III. UJEEDDADA HAY'ADDA LOO ASAASAY.

Hay'addaan Dal-Daddhis waxa loo Asaasay in ay gacan ka geysato baahida beeraleyda yaryar si ay u siyaadshaan waxsoosaar,kooda dhanka cuntada isku filaanshahoodana kor ugu qaadaan.

IV. HAY'ADDA XARUNTEEDA.

Hay'adda Xarunteedu waxay ku ooleysaa Xamar, hase ahaatee, haddii loo baahdo ama ay ballaarato hay'adda sha qadeedu, waxa laamo laga furi karaa meelihii ku habboon oo waddanka gudihiisa, khaas ahaan nawaaxiga beeraha.

V. UJEEDDOOYINKA HAWLEED.

Sugitaanka iskufillaant dhanka cuntada iyo waxsoosaarku waa waajibka ugu horreeya oo ummad kasta saaran, arrin taas oo ah baahi Soomaaliyahadda ka taagan aadna uuga fog dhammaystir. Hay'addaan Dal.Daddhis waxay si weyn isugu taxalujimaysa iyadoo la kaashanaysa hay'adda kolo oo samafalkaa (kuwa gudaha iyo kuwa dibeddaba) inay ga can ka geysato horumarinta beeraha. Hay'addu waxay si khaas ah isugu taxalujinaysa horumarinta beeraleyda yar yar, tacliinta beeraha ee beeraleyda yaryar iyo horumarinta mashruucyada yaryar.

Dal daddhis waxa ujeeddooyinkeeda laf dhabar u ah

inay door weyn ka gasho wax ka qabashada cunta yarida taasoo ku dhisan qorsha dheer. Dal.daddhis waxay ahaanay sa hay'ad aan siyaasi iyo faa'iido doon midna ahayn (NGO) waxay fulinaysa ujeeddooyinka halkaan ku qeexan.

1. Inay ka caawinto beeraleyda yaryar dhanka sharciga ee helitaanka dhulka beeraha.

2. Inay siiso hadba tabartu say tahay, beeraleyda yaryar taageero dhanka farsamada.

3. Inay ka caawinto dhanka waraabka beeraha (kanaalo iwm).

4. Inay ka caawinto dhanka qodidda ceelasha.

5. Soo-saaridda iyo gacan ka siinta bacrinta beeraha (fertilizers).

6. Inay gacan ka siiyaan dhanka dabargoynta cayayaanka beeraha.

7. Ka taageeridda qalabka yaryar ee beeraha.

8. Gacan ka siinta dhan tacliinta beeraha (Agricultural training).

9. Inay samayso meelaha lagu barbaariyo geedaha, si beeraleydu u hesho geedaha khudaartu ka baxdo.

10. Abuurista mashruucyo yaryar oo bulshada u soo jiida dakhli dhaqaale.

11. Ka qaybgelidda arrimaha masiibooyinka dhanka cuntoyarida iyo daadadka iyo fatahaadda wabiyaasha.

12. Soosaaridda burjiko qoraxeedka (production of solar stoves).

13. Dib u habeynta aluminamka (alluminium recycling).

14. Soosaaridda farmaajada, burcadka iyo subaga.

15. Dhaqashada iyo xannaanada xoolaha.

16. Gacan ka geysashada wixii kale oo hay'ad samafal ahi samayn karto mujtamicana wax ugu yaal.

17. Ciribtirka akhris iyo qoris la'aanta iyada oo lagu samaynayo iska wax u qabso dawladdu ka qaybqaadato.

18. Dhiirigelin dugsiyada farsamada laga barto aminta dugsiyada kale xiran yihiin, iyada oo laga baranayo wax goobaha Warshadaha iyo Ganacsiga.

19. Dhiirigelin kasho helitaan tacliin sare ilaa heer Jaamacad iyada oo la kaashanayo deeqda waxbarasho ee shisheeye.

20. Dhiirigelin iyo abaabulid dhismo dugsiyo iskaa wax u qabso.

21. Qalqaalin qalabka waxbarasho buugag daftarro warqado, qalmaan laga keeno dibedda.

22. Abaabulid hab dugsi laga furo degmooyinka meelaha ay ku badan yihiin carruurta aan helin kasho waxbarasho si degdeg loogu furo indhaha.

23. Dhiirigelin hab lagu helo shaqo iyo shaqo barasho.

24. Ku deeqid cunto iyo qalabka kale oo ay u baahan yihiin dadka aan waxba qabsan karin.

VI. Ujeeddooyinka iyo sharciyada kale oo hay'adda

1. Inay hay'addu wax la qabsato oo isla jir ula shaqayso hay'adaha kale oo samafalkan kuwa gudaha iyo kuwa dibeddaba.

2. Inay hay'addu ku darman karto hay'ad kale oo samafal ah, wixii lihi ah oo hay'adda wax ugu yaalna ay ka qaadan karto, haddii waxaasi wax Dal-dad-dhis ujeeddooyinkeeda waafaqsan yihiin bulshadana wax ugu yaal.

3. Inay hay'addu fuliso ujeeddooyinkeeda iyadoo ku tala geleysa mas'uuliyadda u qaadaysa, intii karitaankeeda, kharajka maamulka hay'adda.

4. Inay hay'addu dhanka maaliyadda kala xiriiri karto waxna ka raadsan karto hay'adaha ama shaqsiyaalka gacan siiya samafalka, iyadoo si sharciga waafaqsan danina ugu jirto bulshada faa'iido raadsina aysan ku jirin arrintaas u meel marinaysa.

5. Hay'addu waxay xaq u leedahay inay ama aqbasho ama diido wixii cawimaad ah oo cid kale u soo gudbiso.

6. Hay'addu waxay xisaab ka furan kartaa hadday maamulka hay'adda ula muuqato lagama maarmaan Bankigii ay doonto.

VII. Guddiga Maamulka Hay'adda

Guddiga maamulka hay'dda wuxuu ka koobnaanaya xubnaha hoos ku tilmaaman:-

1. Guddoomiye
2. Maareeye
3. Mareeye ku xigeen
4. Xisaabiye
5. Xoghaye

Waxa dhici karta haddii ay maamulka hay'adda la habboonaato inaan mararka qaarkood jagooyinkaas kor lagu soo sheegay lagu isticmaalin qaarkood. Guddiga maamulka hay'adda tiradoodu kama yaraan karto saddex (3) xubnood kamana badnaan karto toddoba (7), taasoo ku xiran go'aanka asaasayaasha maamulka, shaqada iyo wixii hay'addu leedahay oo dhan waxa maamulaya guddiga maamulka hay'adda. Si hay'adda shaqadeeda iyo ujeeddooyinkeeda lagu fuliyo guddiga maamulka hay'addu wuxuu awood u leeyahay inuu qorto shaqaale u qalma shaqada, waxaana lagu xaq marinayaa shaqaalahaa sidii lagula heshiiyo. Haddii ay ogaadaan asaasayaasha hay'addu in shaqsi shaqaalaha hay'adda ka mid ahi ku kaco waxyaabo ka soo horjeeda danaha iyo ujeeddooyinka hay'adda, asaasayaashu arrintaas waa inay ka qaadaan xilliga ku habboon waqti xadadan.

Mas'uuliyadda Xubnaha Guddiga Maamulka Hay'adda

1. Guddoomiye

Guddoomiyaha mas'uuliyaddiisa waa inuu fadhiyada ama shirarka guddiga maamulka socodsiiyo haddaan wax ahi ka hor istaagin.

Guddoomiyuhu wuxuu qabanayaa wixii caadi ahaan shaqo guddoomiye ah.

2. Maareeyaha

Maareeyaha shaqadiisu waa inuu mas'uul ka yahay hawlaha fulinta hay'adda dhan kastaba ha ahaatee, waana inuu shaqada guddoomiyaha qabtaa markii guddoomiyuhu maqan yahay.

3. Maareeye ku xigeenka

Shaqadiisu waxa weeye inuu la shaqeeyo maareeyaha, haddii maareeyaha iyo guddoomiyuhu maqan yihiin shaqadooda fuliyo.

4. Xisaabiyaha

Iyadoo ku xiran hadba sidii maamulka go'aansho xisaabiyuhu wuxuu mas'uul ka yahay arrimaha lacag qabashada iyo lacag bixinta ee hay'adda, isagoo muujinaya risityada iyo fowjariska arrimahaas la xiriira. Guud ahaan xisaabiyuhu waa inuu hayaa oo kaydiyaa hay'adda xisaabaadkeeda, buugteeda lacagta uuna diyaarsho xisaabaadka bishiiba hal mar isagoo tusaya oditarada markii loo baahdo.

5. Xoghayaha

Qabashada shaqada guud ee xoghaynta ka sokow, xoghayuhu wuxuu qaabilsan yahay arrimaha la xiriira qoraalada, diyaarinta fadhiyada guddiga maamulka, hayinta iyo kaydinta go'aammada Guddiga.

VIII. Shirarka Guddiga Maamulka Hay'adda.

Guddiga Maamulka Hay'addu ugu yaraan bishiiba hal mar bay shir yeelanayaan, shirarkana waxa madax ka ah guddoomiyaha, markuu maqan yahayna, Maareeyaha ama hadday labaduba maqan yihiin, maareeye ku xigeenka. Markii shir la leeyahayba ugu yaraan boqolkiiba konton waa inay guddiga maamulka ka joogtaa.

N.B. Hay'adda Guddigeeda Maamulka sannadkiiba hal mar ayaa hawlihiisa dib muraajaco lagu samaynayaa, haddii maamulka badidiisu isla gartana mas'uuliyadaha waa la kala beddeli karaa. Qofkii ka maqnaada saddex jeer oo isku xigta fadhiga guddiga, guddiga intiisa kale ayaa go'aan ka gaareysa arrintiisa.

IX. Guddiga la Talinta

Guddiga la talintu wuxuu ka kooban yahay afar qof oo mid walba takhasus beeraha ama maamulka leeyahay. Guddigu wuxuu leeyahay khibrad xagga beeraha iyo maamulkaba.

X. Taageerada hay'adda (u fidinta taageerada hay'adda)

Qofkii ama hay'addii doontaa waa taageeri kartaa hay'adda, iyadoon loo eegin dhan diin, waddan, dhalasho iyo wax kale midna, hadday arrintaasi waafaqsan tahay sharciga iyo ujeeddooyinka hay'adda Dal-daddhis. Ciddii taageero bixisaa dib uma ceshan karto wax khaas ahna ma tirsan karto oo hay'ada xaggeeda.

XI. Asaasayaasha

Asaasayaasha oo xubno ka noqon kara guddiga la talinta iyo kan Maamulka labadaba, waxay ahaanaysaa kuwa leh go'aanka kama dambaysta ee wax alla wixii la xiriira arrimaha hay'adda. Wixii ka hor imaanaya danaha iyo ujeeddooyinka hay'adda waa joojin karaan, Asaasayaashu waa agaasin joogtaa ee hay'adda ilaa ay ka geeriyoodaan.

XII. Fatashka Xisaabaha (Auditing)

Sannadkiiba mar waxa guddiga maamulka hay'addu xil saarayaa hal ama labo qof oo fatasha xisaabaadka hay'adda. Fatashayaashu waa inaysan ka tirsanayn maamulka hay'adda. Xisaabiyaha hay'addu wuxuu u oggolaanayaa fatashka xisaabaha wixii dokumenti ah oo xisaabaad la xiriira. Fatashka xisaabuhu wuxuu maamulka iyo taageerayaasha u ...aynayaa khaladka ama saxnaanta xisaabaadka hay'adda.

XIII. Wax ka beddelidda Dastuurka hay'adda

Dastuurka hay'adda waxa wax laga beddeli karaa haddii ay oggolaadaan guddiga maamulka hay'addu intiisa badan iyo asaasayaasha hay'adda, waxaase go'aanka kama dambaystaa leh asaasayaasha.

XIV. Baabi'inta ama xiridda hay'adda

Haddii guddiga maamulka hay'adda iyo asaasayaashu, iyaga oo tala weydiisnaya guddiga la talinta, ay gartaan inay quman tahay in hay'adda la baabi'iyo oo la xiro, ama ay u gartaan in aysan faa'iido u lahay sii wadiddeedu hay'adda waa la xiri karaa. Hay'adda baabi'inteedu waxay ku xirnaanaysaa go'aanka kama dambaystaa ee asaasayaasha. Haddii hay'adda la baabi'iyo, hay'adda hantideeda markii laga jaro wixii hay'adda lagu leeyahay, wixii soo hara waxa la siin karaa hay'ad kale oo samafal ah, ama waxa loo maamulayaa sidii ay asaasayaashu ugu taliyaan ama ay ula habboonaato.

ASASAHA HAY'ADDA SAMAFALKA DAL DADDHIS ISLA MARKAAS AH GUDDOOMIYAHA J/LE DR. CABDIRAXMAAN SHEEKH XASAN AXMED POX 1625 TEL. 22.868

SOOMAALIYA — MUQDISHOW.

In the Name of the Prevident

CONSTITUTION

I. Name:

The organization will be known as Dal_Daddhis, herein after referred to as Land & human Resources Development.

II. Interpretation:

1. Dal_daddhis: This word, in Somali language, means Land and human Resources Development.

III. Statement of Purpose:

Dal_daddhis is established to improve the quality of life in rural Somalia by meeting basic needs and helping increase self-reliance in food production.

IV. Main office:

The head office of Dal_Daddhis will be situated in Mogadishu, Somalia. In case of need and/or expansion of the services of Dal_daddhis, branch offices could be opened to other appropriate centers in the countryc.

V. Service objectives:

The food security of the nation is much more important than any other security need, and Somalia is faced with the task of feeding its people. This need is far from being met and, Dal_Daddhis will strive, with the help of other national and international NGO's, to further agricultural development. The organization will especially engage in agricultural development and education of small-scale farmers and small income generating community development on humanitarian basis. Dal_Daddhis central objective shall be assume a major role in solving food shortages among communities on long range basis.

Dal_Daddhis sahll strictly remain and operate as a non-profit indigenous NGO and non_political organization. In furtherance of the objectives, but not further or otherwise, Dal_Daddhis shall exercise the implementation and/or participation of the following principal services.

1. To assist farmers in the legal espects of land procurement.

2. To provide technical assistance to farmers (esp. small-scale farmers).

3. To assist in irrigation needs (canals ect.)

4. To help provide water (hand_dug/drilling of water wells for farmers).

5. Production (from animal bones) and procurement of fertilizers.

6. Provision of seeds.

7. Pests control (procurement of pesticides).

8. Support on small_scale farm implements.

9. Agricultural education.

10. Nurseries (for planting fruit trees).

11. Creation of small income_generating projects for communities.

12. Emergence/disaster participation (floods, food shortages etc).

13. Production of Solar stopes (for rural communities).

14. Production of cheese, butter and ghee.

15. Animal husbandry.

16. Alluminium recycling.

17. Vegetables drying.

18. Any other charitable projects within the reference of the aims and objectives of the organization as deemed appropriate by the management.

19. Elimination of illiteracy through greater self_help with partecipation and support of the government.

20. Encouragement of vocational education emphasizing work experience training with envolment of business & Industry.

21. Expanding opportunities for higher education up to University level through international assistance as a grant scholarship.

22. Organizing of buildings with community and self_help schemes.

23. Procuring cultural material like tex-books, stationary etc. from in and abrout.

24. Organizing school system in districts where higher proportion of disadvantages children are located.

25. Increasing incentives for seeking employment & job training.

26. Providing food & other necessary assistance for those who are unable to care for themselves.

VI. Other objectives/policies.

1. To collaborate & cooperate as considered appropriate with national and international non_goevrnmental and governmental organizations.

2. To merge or affiliate with, aquire and/or take over any charitable organization and all or any assets in furtherance of Dal_daddhis objectipes.

3. To carry into effect the objectives of Dal_daddhis, by making proper arrangements and for this purpose prodive expenditures to the management of the organization.

4. To raise funds primarily from funding organization and individual donors as shall be considered appropriate, legal and expedient without undertaking any transaction where profit_seeking is involved; and reserve the eight to accept or disclim any donation or assistance without prejudice to the generality of Dad_daddhis.

5. To open and maintain a banking account or accounts in the name of Dal_daddhis at any bank and at any time as may be deemed necessary; and to do all such other legally permissible activities in furtherance of the organization's objectives.

VII. The Executive Board

The Executive Board of Dal_daddhis shall consist of the following officers:-

1. Chairman
2. Executive Director
3. Vice_Director
4. Treasure
5. Secretary

Some of the executive Board offices may not be utilized at times if so deemed appropriate by the management. The Executive Board shall maintain a minium of three (3) and a maximium of seven (7) members, depending on the final judgement of the Founders. All the administration, business, property and finances of Dal_daddhis shall be administered by the Executive Board. In order to carry out the normal operations of the organization, the executive Board shall have the power to recruit or employ any eligible individual as and when considered necessary, depending on the final

approval and decision of the Founders. The persons so employed shall be recompensed as agreed upon.

In the event it comes to the knowledge of the Founders that any employes of the organization has committed actions that contravene the interest and the objectives of the organization, the Founders shall draw the attention of whoever is involved to the matter and will take appropriate action within specified time period.

Responsibilities of the Executive Board

1. The Chairman

The chairman is to function as one of the principal leaders of the organization and will be responsible for the presiding over all meetings of the Executive Board, unless otherwise prevented by a force majure or her reasonable cause.

2. Executive Director

The responsibility of the Executive Director is to function as one of the principal leaders of the organization and will be responsible for the execution of the organization's managerial operations.

3. The Vice-executive director

The function of the Vice-Director is to closely work with the Director and the chairman and perform their duties when both are obsent.

4. The Treasurer/accountant

Based on the decisions and directions of the management, the treasurer will perform the duties of receiving and disbursing of organization funds and should issue receipts for moneys received and maintain vouchers for disbursements. As a whole, the treasurer will be responsible for the organization in the matters of financial record-keeping, preparation of financial statements and preservation of account and books for auditing and/or inspection.

With the prior consultation and approval of the management, the treasurer could delegate part of his duties to another employee under his supervision and will be hold responsible for the proper appropriation. All funds disbursed on behalf of the organization will be authorised by the Executive Board. The Executive Board will be responsible

for all the managerial duties of the organization and may give leadership and direction to the employees in a manner commensurate with the aims and objectives of the organization.

N.B. The responsibilities and the positions of the Executive Board are reviewable at any time considered appropriate by the majority of the Executive Board and the Founders.

5. The Secretary.

Under the directions of the management, the secretary, besides being responsible for the performance of all the normal secretariate duties of the organization, will carry out all the duties pertinent to the correspondence, preparations of schedules to convene meetings and keeping minutes and preservation of records of organization proceedings.

VIII. Executive Board meetings at least once a month, The Chairman; or in his absence the Executive Director or in the default of both these, the Ex-Vice-director will preside all meetings of the organization. The quorum for the executive board meetings will not be less than fifty percent.

Any member failing to attend three consecutive meetings of the Executive Board without some genuine cause, should receive a written notice for justification from the chairman. However, at the event that such a member fails to come up with justifiable reason or continues to be absent from meetings, the rest of the management will take action and he shall cease to be a member of the Executive Board. At his discretion, the chairman shall decide the number of persons allowed to speak against a motion or in favour of it, and resolutions will be made by a simple vote of raising hands.

IX. The Advisory Board

1. Two (2) degree holders in agriculture with lost of experience in farming.

2. An economist/accountant with sufficient experience.

3. An engineer/administrator with adequate experience.

The Advisor Board of the organization shall be registe-

red at the Notary Public of Mogadishu, The number of the Advisory Board shall be not less than three (3) persons at any one time.

X. Supporters/contributors

Any organization or person, regardless of country, Nationality, race, color and fatih shall be eligible for becoming a supporter, donor or a contributor of Dal-daddhis, such supportship being subject to the consent of the Executive Board.

The principal function of a supporter, contributor or a donor, is to assert his support to the organization both in word and action, but cannot claim any special rights or privileges. The executive board of the organization reserves the sole power and responsibility to saction or repect any offer or application of supportership.

Supporters shall be expected to pay an amount of subscription individually as may be decided from time to time by the management of the organization. Any supporter desiring the resign from the organization's patronship, shall have the right and privilege todo so; however, such resignation due consideration to the matter.

The executive board shall have the authority to discontinue and/or exclude any supporter from his supportership for a specified time period, on such grounds that he acts in a manner inconsistent or deterimental to the policy and the interest of the organization.

Any organization or person who gives up or expelled from the status of being a supporter or contributor, will not be entitled to any reimbursement of contributions or subscriptions or any part thereof or any value contributed by him at any time.

The management of Dal-daddhis shall be vested with the responsibility for all the properties, funds and investments acquired in the name of the organization. However, to promote agricultural development in Somalia, Dal-daddhis shall seek and endeavor to facilitate collaboration and cooperation with other indigenous and international NGOs, in particular, the organization shall work together with funding organizations as equal partners in designing programms and development projects. Dal-daddhis will cooperate or collaborate with any organization and will make agreements with

them to obtain any aid, in the form of materials, funds, services and/or manpower in order to run its projects in compliance with the set organizational objectives.

XI. Founders

The founders, who function both in the Advisory Board and the Executive Board, shall be consulted in all decisions as the final authority in the decision making of the organization's affairs. The may overall any decision if they have reason to believe that it is against the interests and the objectives of the organization. The founders shall remain as the supervisors of the organization for life (their names are appendixed to this constitution).

XII. Auditing

An auditor who is not an office holder of the organization, will be appointed by the Executive Board for every year to audit all the records, accounts and the books of the organization.

The treasurer or the accountant of the organization will produce all the necessary documents to be audited to the auditor and the auditor shall be expected to either certify the records as correct and vouched in accordance with organization's policies and proper accounting principles or state his opinion and findings to the contrary.

XIII. Amendments:

The constitution of the organization can be amended, if the amendment so proposed is approved by the majority of the Executive Board and the Founders.

XIV. Dissolution:

If the Executive Board, with prior consultation of the founders and the Advisory Board, decides unanimously that the object of this constitution cannot and will not continue to be carried out or at any time determines that it is advisable to discontinue the organization, the assest remaining after all debts & liabilities are satisfied, could be given to a charitable organization, or shall be supervised by the Founders in the best way appropriate.

THE FOUNDER OF THE INSTITUTION OF LAND & HUMAN RESOURCES DEVELOPMENT IS MR. DR. ABDURAHMAN SHEIKH HASSAN AHMED P.O.BOX 1625 TEL. 22.868 MOGADISHU — SOMALIA.

XEER WASAARADDA ARR. GUDAHA, L. 25 ee 13.6.88 Aqoon si Ururka Samafalka Falsan Voluntry Organization.

WASIIRKA ARRIMAHA GUDAHA

ISAGOO ARKAY: Dastuurka J.D. Soomaaliya;

ISAGOO ARKAY: Sharciga Lr. 30 ee 30.7.84 ee lagu dhisay Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

ISAGOO ARKAY: Qodobka 54/2 ee Xeerka Madaniga Soomaaliyeed Lr. 37 ee 2.6.73;

ISAGOO ARKAY: Xeerka lagu dhisay Ururkaas Samafalka ah;

ISAGOO TIXGELIYEY: Inay lagama maarmaan tahay Abuuris Urura la nooc ah.

WUXUU GUDDOONSHAY

Qod. 1aad

Waxaa si rasmi ahaa nloo aqoonsaday Ururka Falsan Voluntry Organization oo urur Samafal ah, ujeeddadiisuna tahay Horumarinta Mashaariicda la xiriirta Miyiga iyo Magaalooyinka xagga dhaqaalaha iyo Bulshada, Waxbaridda iyo Tababaridda dadka liito oo deggan Miyi iyo Magaalo.

Qod. 2aad

Ururku wuxuu saldhiggiisu noqonayaa Muqdisho, wuxuuna Laamo ku yeelanayaa dalka gudahiisa iyo debiddiisaba.

Qod. 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Wasiirka Arr. Gudaha, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 13.6.1988

WASIIRKA ARR. GUDAHA
(Dr. Maxamed Cabdulle Bacadle)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Xabiibo Xasan Ibraahin;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. lam. 0012300 laga lameeyey Bangiga Dhexe ee Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh.So. 67.500 ku qoran magaca J.le Xabiibo Xasan Ibraahin sida ku cad warqadda lam. 5548 ee Bangiga Dhexe ee Soomaaliyeed;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. L. 0012300 ee Bangiga Dhexe ee Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh.So. 67.500 ku qoran magaca J.le Xabiibo Xasan Ibraahin.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Dhexe ee Soomaaliyeed in uu siiso J.le Xabiibo Xasan Ibraahin lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 67.500 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaamo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 5.10.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 438

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Dhuubo Cabdi Maxamed;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Buug Kayd Lam. 3036 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaa-liyeed Laanta Wadajir kuna jirto lacag dhan Sh.So. 11.107,57 ku qoran magaca J.le Dhuubo Cabdi Maxamed sida ku cad warqadda lam. —— ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soo-maaliyeed Laanta Wadajir;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd Lr. 3036 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wa-dajir kuna jirto lacag dhan Sh.So. 11.107,57 ku qoran maga-ca J.le Dhuubo Cabdi Maxamed.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wadajir iney siiso J.le Dhuubo Cabdi Maxamed lacagta ca-dadeedu tahay Sh.So. 11.107.57 oo ah bedelkii Buug Kaydka kor ku qoran markey ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 5.10.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 489

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamed Cali Maxamed;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Buug Kayd Lam. 18881 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad Xamar kuna jirto lacag dhan Sh.So. 30.249,86 ku qoran magaca J.le Maxamed Cali Maxamed sida ku cad warqadda lam. 1831 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad Xamar;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd Lr. 18881 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad Xamar kuna jirto lacag dhan Sh.So. 30.249,86 ku qoran magaca J.le Maxamed Cali Maxamed.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad Xamar iney siiso J.le Maxamed Cali Maxamed lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 30.249,86 oo ah bedelkii Buug Kaydka kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 15.10.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 490

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdulqaadir Axmed Cali;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 714831 laga sameevey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta W/dhiigley kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000 ku qoran magaca J.le Cabdulqaadir Axmed Cali sida ku cad warqadda lam. 12775 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 714831 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta War dhiigley kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000 ku qoran magaca J.le Cabdulqaadir Axmed Cali.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley iney siiso J.le Cabdulqaadir Axmed Cali lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 50.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 26.10.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 491

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Ismaaciil X. Abuukar Cabdullaahi;

HADDUU TIXGELIYEY: in ay lumeen 2 Jeeg War. lam. 0333428_0674074 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kayd ka Soomaaliyeed Laamaha 1aad Hargeysa iyo 2aad Hargeysa kuna kala jirto lacag dhan Sh.So. 50.000 iyo Sh.So. 40.000 ku kala qoran Yuusuf Jaamac Bulaale iyo Ismaaciil X. Abuukar Cabdullaahi sida ku cad warqadda lam. 12869 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laamaha 1aad Hargeysa iyo 2aad Hargeysa;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. lam. 0333428_0674074 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laamaha 1aad Hargeysa iyo 2aad Hargeysa kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 90.000 ku kala qoran Yuusuf Jaamac Bulaale iyo Ismaaciil X. Abuukar Cabdullaahi

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laamaha 1aad iyo 2aad ee Hargeysa iney siiyaan J.le Ismaaciil X. Abuukar Cabdullaahi lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 90.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 29.10.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 492

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cali Maxamed Guure;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 2 Jeeg War. lam. 1292181-0006619 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad Xamar kuna kala jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 iyo Sh.So. 20.000 ku qoran magaca J.le Cali Maxamed Guure sida ku cad warqadda lam. 13070 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad Xamar;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. Lam. 1292181-0006619 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad Xamar kuna jirto guud ahaan laga dhan Sh.So. 120.000 ku qoran magaca Cali Maxamed Guure;

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad Xamar iney siiso J.le Cali Maxamed Guure lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 120.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 1.11.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 493

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdi Xasan Cosoble;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 1221257 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soo- maaliyeed Laanta Wardhiigley kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 ku qoran magaca J.le Xasan Aadan Siyaad sida ku cad warqadda lam. 13059 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 1221257 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta War dhiigley kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 ku qoran ma- gaca J.le Xasan Aadan Siyaad;

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley iney siiso J.le Cabdi Xasan Cosoble lacagta ca- dadeedu tahay Sh.So. 100.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faallinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 1.11.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 494

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamed Cali Geele Faarax;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Buug Kayd Lam. 2.958 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. Wadajir kuna jirto lacag dhan Sh.So. 308.536.61 ku qoran magaca J.le Maxamed Cali Geele Faarax sida ku cad warqadda lam. 344 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wadajir;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd Lr. 2.958 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. Wadajir kuna jirto lacag dhan Sh.So. 308.536.61 ku qoran magaca J.le Maxamed Cali Geele Faarax.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wadajir inay siiso J.le Maxamed Cali Geele Faarax lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 308.536.61 oo ah bedelkii Buug Kayd ka kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 1.11.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 495

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Ismaaciil Axmed Maxamed;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 4 Jeeg War. ee hoos ku qoran laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Ceerigaabo kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 121.000 kuna kala qoran J.le Ismaaciil Axmed Maxamed iyo J.le Xuseen Bile Xasan sida ku cad warqadda lam. 11123 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Ceerigaabo;

| J.W.Lr. | Sh.So. | Magaca ku qoran | Laanta |
|---|---|---|---|
| 0027501 | 50.000 | Ismaaciil Axmed Maxamed | Ceerigaabo |
| 0027510 | 46.000 | » » » | » |
| 310369 | 5.000 | » » » | » |
| 551720 | 20.000 | Xuseen Bile Xasan | » |

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Shariciga L. 2 ee 9.9.1963.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee kor ku qoran ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Ceerigaabo kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 121.000 ku kala qoran Ismaaciil Axmed Maxamed iyo Xuseen Bile Xasan.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Ceerigaabo in ay siiso J.le Ismaaciil Axmed Maxamed lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 121.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 27.10.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamuud Maxamed Guure;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 22 Jeeg War. ee hoos ku qoran laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad Xamar kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh.So. 2.100.000 ku qoran magaca J.le Cali Maxamed Guure sida ku cad warqadda lam. 13279 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad Xamar;

| J.W.Lr. | Sh.So. | Magaca ku qoran | | | Laanta |
|---|---|---|---|---|---|
| 1157754 | 100.000 | Cali | Maxamed | Guure | 3/Xamar |
| 1157755 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1157756 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1157757 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1157758 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1157759 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1157760 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1157761 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1157762 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1157763 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1157764 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1157765 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1157766 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1157767 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1157768 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1157769 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1157770 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1157771 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1157772 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1157773 | 100.000 | » | » | » | » |
| 0694286 | 50.000 | » | » | » | » |
| 0694287 | 50.000 | » | » | » | » |

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee kor

ku qoran ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad Xamar kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 2.100.000 ku qoran magaca J.leCali Maxamed Guure.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad Xamar in ay siiso J.le Maxamuud Maxamed Guure lacagta cadadkeedu tahay Sh.So. 2.100.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 8.11.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 498

MAXKAMADDA GOBOLKA BAY
GUDDOOMIYAHA MAX. G. BAY

MARKUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

MARKUU ARKAY: waxay ku saabsan tahay iyo ogeysiiska Bangiga;

MARKUU ARKAY: Qod. 69 D.L. 9.9.65 N. 2 Lumidda Buugga Kaydka Lam. 4747 oo ay ku qoran tahay Sh.So. 700.000 Bangiga Ganacsiga Laanta Baydhabo.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo Buugga Kaydka ka dib markii ay ka soo wareegto 30 maalmood, maalinta Dekreetada lagu soo shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In Buugga cusub ee la sameyn doono gacanta laga saaro Muxubo Xuseen Macalin Maxamed ama qof isla iyada ka sita wakaalad sharci ah, iyadoo la sugaayo mudada 30ka maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay.

Baydhabo, 31.10.1988

GUDDOOMIYAHA MAX.G.BAY
(Aadan Wardheere Cali)

L. 493

MAXKAMADDA GOBOLKA SH/HOOSE MARKA

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA

MARKUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

MARKUU ARKAY: Buugga Kaydka lam. 7016, lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Marka, kuna qorneyd lacag dhan Sh.So. 100.000 (Boqol kun) Shillin uuna lahaa Yuusuf Axmed Xasan Cilmi sida ku cad warqadda lam. yahay 000836 Taar. tahay 1.11.88, kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Marka;

MARKUU ARKAY: Qod. 69 ee Sharciga Lam. yahay 9 ee Taar. 11.9.1965 N. 2.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buugga Kaydka Lam. 7016, kuna qoran magaca Yuusuf Axmed Xasan Cilmi, ayna ku jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 (Boqolkun).

WUXUU AMRAYAA

In Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Marka u bedelo Yuusuf Axmed Xasan Cilmi, Buugga kor ku tilmaaman mid la mid ah, ka dib markii ay ka soo wareegto muddo dhan 15 maalmood gudahood maalinta go'aankan lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan la keenin wax is-hortaag ah.

Marka, 5.11.1988

GUDDOOMIYAHA MAX. G. SH/HOOSE
(Seylac Sheekh Cumar)

L. 497

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Saxardiid Raage Kheyre;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 2 Jeeg War. lam. 0102206-0102207 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad Hargeysa kuna kala jirto lacag dhan Sh.So. 500.000 iyo Sh.So. 450.000 guud ahaan Sh. So. 950.000 ku qoran magaca J.le Saxardiid Raage Kheyre sida ku cad warqadda lam. ——— ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad Hargeysa;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. lam. 0102206-0102207 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad Hargeysa kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 950.000 ku qoran magaca J.le Saxardiid Raage Kheyre.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad Hargeysa in ay siiso J.le Saxardiid Raage Kheyre lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 950.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 10.11.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 500

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Jaamac Muumin Maxamed;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 2 Jeeg War. lam. 1324384-1324385 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad Xamar kuna kala jirto lacag dhan midkiiba Sh.So. 100.000 guud ahaan Sh.So. 200.000 ku qoran magaca J.le C/risaaq Maxamed Ciise sida ku cad warqadda lam. 13399 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad Xamar;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. lam. 1324384-1324385 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad Xamar kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 200.000 ku qoran magaca J.le C/risaaq Maxamed Ciise.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad Xamar in ay siiso J.le Jaamac Muumin Maxamed lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 200.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aan ka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 9.11.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 501

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamed Salaad Xasan;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 2 Jeeg War. lam. 0767174-0767205 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad Xamar kuna kala jirto lacag dhan min Sh.So. 50.000 guud ahaan Sh.So. 100.000 ku qoran magacyada J.le Xaawo Xuseen Xirsi iyo J.le Xasan Jaamac Nuur sida ku cad warqadda lam. 13400 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad Xamar;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. lam. 0767174-0767205 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad Xamar kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 100.000 ku kala qoran J.le Xaawo Xuseen Xirsi iyo J.le Xasan Jaamac Nuur.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad Xamar in ay siiso J.le Maxamed Salaad Xasan lacagta cadeedu tahay Sh.So. 100.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreyas aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 10.11.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 502

MAXKAMADDA GOBOLKA BAY

UJEEDDO: BAAFIN JEEG

Anagoo Tixraacayno warqadda Tr. tahay 9.10.88da, kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Baydhabo, kuna saabsaneyd lumitaanka Jeegga War. ee uu ku qoraa Shira Khaliif Baalle L. yahay 1262580 ee Tr. 27.8.88, ayna ku qoran tahay lacag dhan Sh.So. 100.000 (Boqolkun) oo Shilin. Sidaa darteed waxaa laidinka codsanayaa inaad Baafisaan Jeeggaas isla markaas marka ay ka soo wareegto 30 casho maalinta laga siidaayo Raadiyaha, lagu Shaaciyo Dekereetada Rasmiga ah, isla markaa Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Baydhabo waxaa la farayaa, in ay siiyaan Jeeg cusub oo ay ugu badalaan Jeeggaas lumay lacagta ku qoran.

Baydhabo, 10.10.1988

GUDDOOMIYAHA MAX. G. BAY
(Aadan Wardheere Cali)

L. 503

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Xuseen Xasan Hiraabe;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 0222663 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad Xamar kuna jirto lacag dhan Sh. So. 300.000 ku qoran magaca J.le Xuseen Xasan Hiraabe sida ku cad warqadda lam. 13388 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad Xamar;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga lam. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. L. 0222663 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed L. 3aad Xamar kuna jirto lacag dhan Sh.So. 300.000 ku qoran magaca J.le Xuseen Xasan Hiraabe.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad Xamar in ay siiso J.le Xuseen Xasan Hiraabe lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 300.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 9.11.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 504

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Arjiga ay soo qoratay Aamina Maxamed Xasan;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 5 Jeeg War. ee hoos ku qoran laga sameeyey Laamo kala duwan ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh.So. 905.000 kuna kala qoran magacyo kala duwan sida ku cad rawqadda lam. 10655 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;

| J.W.Lr. | Sh.So. | Magaca ku qoran | Laanta |
|---|---|---|---|
| 0167700 | 500.000 | Maxamed Cali Xasan | 1/Xamar |
| 0139761 | 105.000 | Maxamed Nuur Mukhtaar | Baydhabo |
| 1206773 | 100.000 | Cabdullaahi Iidow Warsame | 1/Xamar |
| 1163261 | 100.000 | Maye Sheekh Maye | Marka |
| 1219511 | 100.000 | Cabdullaahi Nuur Faarax | W/dhiigley |

HADDUU ARKAY: Qod. 69 ee Sharciga L. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee kor ku qoran oo ka soo baxay Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed laamaha kor ku xusan, kuna qoran mid walba magaca ku hor yaal kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh. So 905.000/=.

WAXAA LA AMRAYAA

Laamaha kor ku xusan ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiyaan Aamina Maxamed Xasan lacagta cadadeedu tahay Sh So. 905 000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS. haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 28.9.1988

GUDDOOMIYAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

T. 505